# Tallaalka ayaa loo fidinayaa 16- iyo 17-jirrada

Dawladdu waxa ay go'aamisay in 16- iyo 17-jirrada loo fidiyo tallaalka koroonaha, kaddib markii Machadka Caafimaadka Dadweynuhu sidaas ku taliyay.

Machadka Caafimaadka Dadweynuhu (FHI) waxa uu ku talinayaa in dadka dhashay 2004 iyo 2005 loo fidiyo tallaalka koroonaha. Dawladdu waxa ay qaadatay taladaas, waxaanay markaa dadkan ku daraysaa barnaamijka tallaalka koroonaha.

– Inta badan dhallinyarada jirta 16-17 sano aad ma ugu xanuunsadaan covid-19, laakiin maadaama is-qaadsiinta cudurku ay xagaagii kor u kacday dhallinyarada yaryar iyo dhallinyarada waaweyn dhexdooda, waxa kordhi kara dhallinyarada aad ugu xanuunsan doonta cudurka. Tallaalku waxa uu difaacayaa qofka, waxa u keenayaa in dhallinyaradu hesho maalmo sidii caadiga ahayd ku sii dhawaanaya, islamarkaana waxa uu gacan ka geysanayaa difaaca guud ee dadweynaha. Tallaalista dhallinyaradani waxa kale oo ay gacan ka geysan kartaa yaraynta faafidda cudurka ee bulshada dhexdeeda taas oo keenaysa in ay yaraato is-qaadsiinta cudurka ee carruurta yaryar dhexdooda ah, ayuu yidhi Bent Høie oo ah wasiirka caafimaadka iyo daryeelka.

Bilowgii Julaay waxa uu FHI soo jeediyay talo ku meel gaadh ah oo ku saabsan in tallaalka loo fidiyo dhallinyaradan, laakiin waxa ay rabeen in ay qiimayn kale sameeyaan marka la helo aqoon cusub oo ku saabsan tallaalista dhallinyarada. Aqoonta cusub ee soo baxday lixdii toddobaad ee u dambeeyay ayaa sii xoojinaysa talada ku saabsan in tallaalka loo fidiyo 16- iyo 17-jirrada, ayuu FHI ku qoray warcelintiisa.

## Waxa la tallaalayaa marka la dhammeeyo tallaallista dadka ka weyn 18 sano

16- iyo 17-jirrada waxa tallaalka loo fidinayaa marka si buuxda loo wada tallaalo

dadka ka weyn 18 sano. Laakiin waxa degmooyinka loo oggolaanaya in haddii ay jiraan duruufo gaar ahi ay tallaalka u soo hormarin karaan shakhsiyaad jira 16-17 sano, tusaale ahaan dhallinyaro aadaysa iskuul ku yaalla waddan kale islamarkaana u nugul qaadista cudurka.

Hawlaha maamulidda tallaalistu waa kuwo adag islamarkaana ma la rabo in kaalkaalisooyinka caafimaadka ee iskuullada lagu mashquuliyo hawsha tallaalista, taas darteed waxa tallaalistu ka dhacaysaa xarumaha tallaalista ee degmooyinka, si la mid ah tallaalista dadweynaha intiisa kale. Arrintani waxa ay waafaqsan tahay talada FHI.

## Waxa lagu talinayaa in loo fidiyo tallaalka Comirnaty ee BioNTech/Pfizer

Waxa hadda jira labo tallaal oo la oggolaaday in lagu tallaalo dadka jira 12-17 sano, waana tallaalka Comirnaty ee BioNTech/Pfizer iyo tallaalka Spikevax ee Moderna. Talada ku meel gaadhka ah ee FHI ayaa ah in dhallinyarada Norway caadi ahaan loo fidiyo tallaalka Comirnaty.

Tallaalka Comirnaty ayaa oggolaanshaha haystay muddada ugu dheer. Maraykanka oo keliya waxa ilaa 15-ka Ogos cirbaddii koowaad lagu tallaalay 12 milyan oo 12-17 sano jira waxaana cirbaddii labaad lagu tallaalay 9 milyan. Tallaalka Moderna ayaa Julaay 2021 la oggolaaday in lagu tallaalo dhallinyarada, taas darteedna weli khibrad badan looma laha tallaalkan. Si kastaba waxa FHI hoosta ka xarriiqayaa in daraasadaha tallaalladu muujiyeen in labada tallaal isku mid ka yihiin dhinaca waxtarka iyo ammaankaba.

## 8-12 toddobaad ayaa u kala dhaxaynaya

16- iyo 17-jirrada waxa loo fidin doonaa labo cirbadood oo tallaalka ah, si la mid ah dadweynaha intiisa kale. Waxa la qorshaynayaa in 8-12 toddobaad u dhexeeyaan cirbadda 1-aad iyo ta 2-aad. Labo arrin ayaa u sabab ah arrintan.

- Sababta ugu muhiimsan ayaa ah in aan weli aqoon wacan loo lahayn dhibaatada dhif iyo naadirka ah ee laakiin aad u daran ee wadata caabuq wadne (myokarditt) ee ka iman karta qaadashada tallaallada mRNA-ga ah. Caabuqa wadnaha waxa inta badan la soo sheegaa marka la qaato cirbadda labaad. Ka hor intaan dhallinyarada Norway aan la siinin

cirbadda labaad, waxannu rabnaa in aqoon dheeraad ah loo yeesho halista ka imanaysa iyo sida loogu xanuunsanayo caabuqa wadnaha. Aqoontaas waxaynu helaynaa bilaha soo socda marka waddamo badani tallaalaan dadka jira da'aadkan. Hay'adda Dawooyinka ayaa si wacan u la socon doonta cilladaha ka imanaya tallaalka, ayuu yidhi Høie.

- Sababta kale ayaa ah in cirbadda koowaad laga helo difaac ka hortagaya in qofku aad u xanuunsado oo cisbitaal la dhigo, iyo in dhallinyaradu caadi ahaan faa'ido ka hesho oo dhibna kala kulmin tallaallada. Daraasaado cilmiyeed oo cusub ayaa muujiyay in muddada u dhaxaysa cirbadaha tallaalka oo la dheereeyo ay keenayso difaac ka wacan difaaca la helayo marka la gaabiyo muddada, arrintaas oo lagu yaqaano tallaallada kalena.

Haddii la helo aqoon cusub, waxa la soo gaabin karaa muddada u dhaxaysa cirbadaha.

## Dhallinyarada ayaa iskood dooran kara in la tallaalo

Qofku awood ayuu u leeyahay in uu qaato go'aammada ku saabsan caafimaadkiisa marka uu gaadho 16 sano jir. Dhallinyarada buuxisay 16 sano waxa ay taas darteed dooran karaan in la tallaalo iyo in kale. Haddii ay ka yar yihiin 16 sano waa in dadka haysta masuuliyadda waalidnimo (inta badan waa labada waalid) ay oggolaadaan tallaalista. Waa in si weyn loo tixgeliyo waxa uu rabo qofka dhallinyarada ah ee ka yar 16 sano.